ESSA

ESSA waxay dib u fasaxday Sharciga Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee 1965 (ESEA). Waxay mudnaanta siisaa heerka guusha sare iyo sinnaanta ardaydeena waxayna taageertaa barayaasha waxtarka leh. Iyaga oo qayb ka ah ESSA, degmooyinka iyo iskuulada waxaa lagu hagayaa inay waalidiinta siiyaan waxyaabaha soo socda:

1. Warbixinada horumarka shaqsiyeed ee ku ogeysiinaya sida uu ilmahaagu u horumarayo
2. Aqoonta xirfadeed ee macalimiinta iyo caawiyeyaasha waxbarida fasalka
3. Ogeysiinta haddii macalinka ardaygu haysto shahaado/shatiga gobolka oo xaddidan
4. Macluumaadka qiimaynaha gobolka iyo kuwa deegaanka
5. Xeerarka Gobolka ama LEA ee ku saabsan ka qaybgalka qiimaynaha ee ardayda

Si aad Wax Badan uga Ogaato...

Horumarka ilmahaaga

Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad la xiriirto macalinka ilmahaaga si aad wada hadal macno leh ugala yeelato horumarkiisa/keeda. Iskuulka ilmahaagu wuxuu sidoo kale u taageeri doonaa aqoontan siyaabaha soo socda:

- Shirarka Dejinta Hadafka
- Shirarka Horumarka
- Warbixinada Horumarka/ Kaararka Warbixinta
- Waxa kale oo laga yaabaa inay ku jiraan kuwan soo socda oo ka yimid macallimiinta: muunadaha shaqada, faylalka, mashaariicda, natiijooyinka qiimaynta, qoraallada, emailada, wicitaanada telefoonka, iwm.

Aqoonta xirfadeed ee macalinka ilmahaaga ama caawiyaha waxbarashada fasalka

Bogga Title I ee ku yaalla websaydka degmada ayaa wadaaga foomka codsiga si loo helo macluumaadka ku saabsan shahaadooyinka oo laga heli karo:
https://www.isd742.org/domain/577

Waxaa kale oo aad kala xiriiri kartaa Xafiiska Title I ee soo socda: Title I Office, St. Cloud Area School District 742, 1201 2nd St. South, Waite Park, MN 56387 or 320-2370-8000, ext. 8095

Qiimaynta gobolka ama deegaanka iyo nidaamkooda:

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku yaalla websaydka guud ee degmada qaybta Tacliinta, Qiimaynta iyo Imtixaanka, ama isticmaal link-ga soo socda: https://www.isd742.org/domain/591

Iskuulka iyo macalinka ilmahaaga ayaa sidoo kale ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo tan u gaar ah.

Title I

Degmada Iskuulada

Waalidiintu Xaqa ay u leeyihiin

St. Cloud Area School District 742

Aqoonta Xirfadeed ee Macalimiinta iyo Caawiyeyaasha Waxbarida

Macluumaadka Qiimaynta

Degmadeena waxaa ka go'an in ay ka caawiso ilmahaaga in uu horumariyo xirfadaha bulsheed, tacliineed, iyo fikirka muhiimka ah ee looga baahan yahay si uu ugu guulaysto iskuulka. Ballanqaadkaas waxa ka mid ah hubinta in macalimiinteena iyo caawiyeyaasha waxbarashada fasalku ay yihiin kuwo u qalma oo xirfad leh.

Waalidiinta carruurta dhigata iskuulada Title I, Part A, ayaa waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan oo ay helaan macluumaadka ku saabsan shahaadooyinka macalinka iyo caawiyeyaasha waxbarashada fasalka ee siiya waxbarida ardaydooda.

Aqoonta/u qalmitaanka macalinka

Macluumaadkani waxaa uu sheegayaa in macalinku…

- Uu buuxiyey shuruudaha gobolka iyo shuruudaha shatiga ee heerarka fasalka iyo maadooyinka uu macallinku wax ku barayo.
- In uu wax ku barayo isaga oo ku jira xaalad degdeg ah ama xaalad kale oo ku meelgaar ah taas oo u qalmitaanka gobolka ama shuruudaha shatiga lagaga dhaafay.
- In uu wax ku barayo waaxda loo xilsaaray ee loo shatiyeeyey.

Aqoonta Caawiyaha Waxbarashada Fasalka

Barnaamijka Title I, Part A, caawiyeyaasha waxbarida fasalku waa in ay ku hoos shaqeeyaan kormeerka macalin shahaado haysta.

Si loo buuxiyo shuruudaha barnaamijka Title I, Part A, caawiyeyaasha waxbarashada fasalku waa inay haystaan shahaado dugsi sare ama GED waana inay haystaan mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Ugu yaraan laba sano oo waxbarasho ah ku qaatay machad tacliin sare
- Kasbaday shahaadada Associate ama wax ka sarreeya
- In uu ku gudbay Qiimaynta ETS ParaPro Assessment (Qiimeyntani waxay cabbirtaa xirfadaha iyo aqoonta mowduuca ee la xiriira akhriska, qorista, iyo xisaabta.)

Macluumaadka Qiimaynta Gobolka iyo Deegaanka: Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaadka qiimaynaha ay waajibiyeen gobolka iyo degmadu. Macluumaadkan waxa ku jira mawduuca la qiimaynayo, ujeedada qiimaynta, iyo isha meesha ay ka imanayso qiimayntu. Macluumaadkan, sida hadba loo heli karo, waxaa ku jiri doona kuwa soo socda:

- Inta ay leegtahay muddada/qiyaasta la filayo iyo jadwalka qiimaynta
- Wakhtiga iyo qaabka faafinta natiijooyinka

Macluumaadka Gobolka ama Xeerarka LEA ee ka Qaybgalka Ardayga ee Qiimaynta

Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay ilmaha ka reebaan qiimayntan, haddii ay khusayso. [ESSA Section 1112 (e)(2)(A)]

Waa maxay sababta Imtixaanka Gobolka loogu baahanyahay?

Qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan sida ilmahoodu ugu horumarayo in uu gaaro kulliyadda iyo u diyaargarowga shaqada. Degmooyinku waxay u baahanyihiin inay ogaadaan in manhajka ay doorteen in ay wax ku baraan ardaydoodu uu buuxinayo heerarka waxbarashada gobolka uu shaqaynayo iyo in loo baahanyahay in wax laga beddelo. Qiimaynahan ayaa naga caawin karta inaan qaadano go'aamo waxbaris oo xog ogaal ah.

Kaarka Warbixinta ee Arday kasta

Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan in si wanaagsan uu ilmahoodu u horumarayo. Iskuulada howlgeliya barnaamijyada Title I, Part A, waa inay soo saaraan warbixinta horumarka arday kasta oo sharxaysa sida ugu wanaagsan ee ardaygu u qabanayo maaddooyinka asaasiga ah.

Barnaamijka Title I, Part A

Lacagta federaalka ee Title I ayaa waxay u ogolaadaan degmooyinka iyo iskuulada inay bixiyaan taageero dheeri ah oo loogu talagalay ardayda. Title I, Part A, waa mid ka mid ah barnaamijyo badan oo ay maamusho ESSA. Laba nooc oo barnaamijyo ah ayay iskuuladu ku maalgelin karaan Title I, Part A, waa Kaalmo Iskuulka oo dhan ah iyo Taageero Bartilmaameed gaar ah leh. Goobaha ISD 742 ee Title I, Part A, waxay ku hawlgalaan "Iskuulka oo dhan" taasoo macnaheedu yahay in dhammaan ardayda, iyada oo ku salaysan baahida waxbarasho, ay xaq u leeyihiin inay helaan taageerooyin dheeraadka ah.